

**Xeer-Sharci 2 Abiriil 1959, lamba. 5 diw.**

**Wax-ka-beddelka qodobka 76aad, ee sharciga 12 Disember 1958, lamba. 26, ee diw: “Dorashooyinka siyaasiga”.**

### **MAAMULAH**

Asaga oo Cuskanayo awoodda uu siinayo qodobka 8aad, ee Amar-gooyada 5ta Jannaayo 1956, lamba. 2;

Markuu arkay sharciga 12 Disember 1958, lamba. 26 “Doorashooyinka siyaasiga”;

Markuu garaaqwsaday baahida iyo degdegta loo qabo in wax-k-beddel lagu sameeyo qodobka 76aad, ee sharciga horey loo soo sheegay;

Markuu Dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Markuu arkay Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

### **WUXUU XEERAYAA**

#### **Qodob kaliya**

Qodobka 76, ee Sharciga 12ka isember 1958, lamba. 26, waxaa loo beddelayaa sidan:

“Isugu yeerista kowaad Golaha Xeerdejinta waa in aysan imaan ka hor maalinta afartan iyo shanaad, kana dib dhicin maalinta toddobaatan iyo shanaad, laga bilaabo taariikhda maxdarkii ugu dambeeyey, eek u dhawaaqidda dadka la doortay, eek u xusan qodobka 56aad”.

“Taariikhda waxaa lagu goynayaa Xeer uu soo saaro Maamulaha”.

Xeerkana waxa uu dhaqangelayaa taariikhda manta ah, waxaana loo bandhigaya Golaha Xeerdejinta, sí loogu beddelo sharci, ugu dambeyn bilowga Kal-fadhiga ku xiga taariikhda nashrinta.

Muqdisho, 2da Abiriil 1959.

U-saxiixaha Maamulaha

**Francia**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

Wasiirka Arrimaha Gudaha

**Xaaji Muuse Boqor**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey – diw. lamba. 16, Xaashi lamba. 17

Muqdisho, 9 Maajo 1959.

Hanti-dhowraha Xisaabaha: **Spadaro.**